


2016-09-28
Somaliska
Patientanvisning för klamydiaundersökning,
vaginalsekret i urin

Tilmaanta bukaan socodka baaritaanka kalamiidiya, dheecaanka siilka ee ku jira kaadida

Ka hor qaadida baaritaankan waxa loo baahanyahay

- Warqada soo gudbinta ee dhakhtar
- Koob caag ah
- Xirmada kalamiidiya ee loogu talagalay kaadida, wadata tuumbo iyo dhuun dhuuban
- Qoriga baaritaanka
- Qafiska lagu soo qaadayo
- Haddii baaritaankan lagu soo dirayo boosta waxa loo baahanyahay: Galka waraaqaha ee alaabta jabida ka ilaalisa oo wata cinwaanka iyo farankaboollo



Koob
balaastig
ah



Xirmada
kalamiidiya ee
kaadida



Qoriga
baaritaanka



Qafiska lagu
soo qaadayo

Qaadida baaritaanka

Baaritaankan waa in la qaadaa subixii ama ugu horeyn laba saacadood ka dib marki ugu dambeysay ee aad kaadiday.

1. Tuumbada baaritaanka iyo qafiska lagu soo qaadayo labadabu waa inay ku calaamadsanadaan warqad magacu ku qoranyahay ama warqad lambar leh oo ka timi warqada soo gudbinta ee dhakhtar.
2. Ku kaadi qiyaasti 2 cm gudaha koobka caaga ah, waa muhiim in kaadida ugu horeysaa ay la socoto.
3. Tuumbada kor u hay oo si tartiib ah ugu garaac meel isla siman si dhibcaha looga saaro daboolka la wareejiyo.
4. Daboolka tuumbada wareeji oo ka fur. Kaadida ku soo nuug dhuunta dhuuban oo buuxi tuumbada ilaa iyo inta tirada kaadidu ay u dhaxaynayso calaamadaha ku yaala falaaraha madow.
5. Qoriga baaritaanka geli siilka ilaa iyo dhowr sentimitir oo qoriga ku wareeji dhowr wareeg dhinacyada siilka.
6. Qoriga si xoog ah ugu wareeji tuumbada ay ku jirto kaadidu oo kaga soo saar dareerahan. Iska tuur qorigan. Furka si fiican ugu xir oo isku dhex qas baaritaankan iyadoo la rog-rog 3-4 goor.
7. Tuumbada geli qafiska lagu soo qaadayo.
8. Baaritaankan sida ugu dhakhsaha badan keen shaybaarka daryeelka ee ugu dhow.
9. Haddii baaritaankan lagu soo dirayo boosta. Baaritaanka iyo warqada soo gudbinta ee dhakhtarka geli galka lagu rido alaabta jajabi karta oo ku rid sanduuqa boosta ama xafiiska boosta.